



# Macluumaadka Taageerada luqadda Ingiriisiga ee ka jirta Dugsiyada Dowlad-goboleedka Queensland

Ingiriisiga oo ah luqad ama lahad dheeraad ee (EAL/D), horena loogu yaqaaney Ingiriisiga oo Luqad Labaad ah (ASL), waa daraasad waxbarasho oo takhasus ah oo ujeedda baridda Ingiriisiga barteyaasha kuwaas oo aan ugu hadlin Ingiriisiga Australia ee Caadiga sidii luqaddooda kowaad.

## Barteyaasha EAL/D ee Queensland

Barteyaasha EAL/D waxay ku hadlaan luqad ama lahad aan Ingiriisi ahayn waxayna u baahan yihiin taageero xagga luqadda Ingiriisiga si ay u helaan manhajka ku habboon da'dooda.

Maahan dhammaan barteyaasha ku hadla luqadaha ama lahadaha kale barteyaasha EAL/D sababtoo ah waxaa laga yaabaa inay leeyihiin aqoon Ingiriisi oo ku flan si ay si firfircoon uga qaybgalaan manhajka dugsiga.

Barteyaasha EAL/D waxaa ku jiri kara kuwa Australia ku dhashay oo ku soo koray qoysaska kuwaas oo ku hadla luqad ama lahad aan Ingiriisi ahayn, sida ardayda aboorjiinka ama Torres Strait Islander ama carruurta soo-galootiga. Ardaydaas ku dhalatay dibadda Australia waxaa ka mid soogalootiga baii-adamnimada, ardayda caalamiga ah iyo kuwa soo-galootiga.

## Aqoonsiga barteyaasha EAL/D oo u baahan taageero

Dugsiyadu waxay ku aqoonsadaan barteyaasha EAL/D habka dugsi-ku-qoridda ama hababka fasallada dhexdooda ka socda.

Inta lagu jiro habka dugsi-ku-qoridda, dugsiyada waxay ururiyaan intii macluumaad macquul ah oo suurtagal ah oo ku saabsan luqadda kowaad ee ardaygu aqoonta u leeyahay. Ardayda qaarkeed waxaa dhacda in isla markiiba loo qoonsado inay yihiin barteyaasha EAL/D oo lagu helay habkan.

Barteyaasha EAL/D ee kale waxaa keliya oo lagu aqoonsan karaa dhaqanka waxbarasho ee fasalkooda dhexdiisa iyo adeegsiga luqadda. Barteyaasha fasalku waxay ku aqoonsadaan Barteyaasha EAL/D ayadoo la marayo isku-darka kor-kala-socoshada iyo baarista sambalada shaqada oo ay ka mid yihiin natiijooyinka imtixaanada, jawaabaha qoraalka ah iyo wareysiyada/kulanka lala yeesho ardayda.

## Taageeridda Barteyaasha EAL/D

Barteyaasha EAL/D waxay u baahan yihiin qaabab barid oo gaar ah si loo dhiso asaas luqadeed si loo gaaro waxbarasho fasalka dhexdiisa oo guul ah iyo in dugsiyada taageero siiyaan loola jeedo baahiyaha ardayda. Barteyaashu waxay go'aamiyaan 'aqoonta luqadda Ingiriisiga' ee ardayda ayadoo adeegsanaya [Bandscales State Schools \(Queensland\)](#), waxayna siiyaan barid si loo daboolo baahiyaha gaar ee luqadda ee ardayda marka loo eego aragtida fasalka dhexdiisa.

Dugsiyada ayaa sameeya go'aannada ku saabsan nooca taageerada ee la siiyo ayadoo ku salaysan heerarka barteyaasha EAL/D aqoonta luqadda Ingiriisiga xagga dhagaysiga, hadlidda, aqrinta iyo qoraalka, iyo mowqifka dugsiga.

Barteyaasha EAL/D waxaa la baraa [Manhajka Australian](#) oo ku habboon da'dooda barteyaashu waxay adeegsadaan habab kala duwan si loo howlgeliyo barteyaasha EAL/D waxayna ka caawisaa inay gaaraan waxbarashada laga filayo.

## Qiimaynta iyo warbixinta

Barteyaasha EAL/D waxay baranayaan ujeeddada manhajka isla markaasna waxay baranayaan Ingiriisiga. Si loo go'aansado fahamka ujeeddada, barteyaashu waxay bixiyaan howlaha qiimaynta oo siinaysa heerarka barteyaasha ee aqoonta Ingiriisiga. Ayadoo ku xiran heerarka aqoontooda Ingiriisiga, dalabyada luqadda ee howsha waa la soo gaabin karaa, taas oo u ogolaanaysa ardayda si xoogga loo saaro in la muujiyo fahamkooda ee ujeeddada manhajka gaarka ah. Tusaale ahaan, barteyaasha ku jira marxaladihii hore ee ku-helidda Ingiriisiga waxay muujin kartaa fahamka ujeeddada ayadoo la marayo muujinta, farshaxanka, matalaadda ama hadalka.

Ardayda waxaa lagu qiimeeyaa loogana warbixiyaa marka loo eego heerka waxqabadka ee heer sannadeedka manhajka la barayo, si kastaba, ardayda EAL/D oo ku jira 12ka bilood ee ugu horreeya dugsi-dhigashada Australia way ka reebnaan karaan arintan. Ardaydan, warbixintoodu waxaa ku jira oraahyo qoraal ah oo ku saabsan aqoontooda luqadda Ingiriisiga marka loo eego [Bandscales State Schools \(Queensland\)](#), iyo sidoo kale waxqabadka ka jira qaybaha waxbarashada ee [Manhajka Australia](#) haddii ay ku habboon tahay.